



Sinnaanta Caynta

Leveled



Af Somali



Buuggan akhriska dheeriga waxaa maalgalisay hay'ada USAID. Wuxaan si wada jir ah isaga kaashaday daabcayna hay'ada Save the Children, wasaarada waxbarashada heer federal iyo xafiiska waxbarashada DDSI.

2009 T.I.



Save the Children



The CC By license lets others distribute, adjust, and build upon this work, for free or commercially, as long as credit is given to the original creation. However, any changes from the original must be indicated.

For more info please refer: <https://creativecommons.org/licenses/>



Sinnaanta Caynta

Fasalka 4

| Toddobaadka 12



Baraha qaaliga ahow

Waxaa buugan luugu talagalay in uu kobciyo awooda akhriska ee radayda fasalka 4^{aad}.

Waxaaana lagu saleeyay manhajka cusub ee af-soomaaliga. Doorka baruhu aad ayuu mihiim ugu yahay in ardaydu ka faa'iidaystaan buugan.

Sababtoo ah waxaa laga rabaa baraha in uu ku booriyo ama ku dhiirigaliyo carruurta in ay akhristaan buugtan. Hadaba baruhu waa in uu raacaa talaabooyinkan soosocda, marka ay tahay ardaydu in ay ku akhristaan fasalka gudihiiisa.

1. Ka hor intayna ardaydu akhrinta sheekada bilaabin,waa in uu baruhu weydiyaa su'aalaha ka horeeya sheekada.
2. Waa in uu baruhu ardayda siiyaa waqtii fiican ooy ku akhrin karaan sheekada.
3. Baruhu waa in uu usheegu ardayda in ay ku celceliyaan akhriska sheekada.
4. Ardaydu markay dhammeyaan akhisika sheekada ,baruhu waa in uu waydiyaa su'aalaha ku qoran dhammaadka sheekada.

Laylis

Su'aalaha akhriska ka hor

1. Waa maxay cayntu?



Cutubka 1^{aad}: Barashda Caynta

Sida aan ognahay dhammaan noolaha aduunka ku nooli wuxuu u qaybsamaan lab iyo dhedig, labadan oo aan kala maarmin. Hadaba caynta ama jinsigu waa kala duwaanshaha labka iyo dhadigga sidookale waa wax qabadka ama doorka kala duwanaansha labka iyo dhediga. Noloshu waxay u baahantahay laba nooc kuwaas oo kala ah lab iyo dhadig. caynta ama Jinsiga waxaa looga jeedaa ragga iyo dumarka, gabdhaha iyo wiilasha. Haddaba qoysasku waxay ka kooban yihiin lab iyo dhadig. Sida ay caynta ama

jinsigu u kala duwanyihiin ayay hawlaho ay qabtaana ugu kala duwan yihiin, in kastoo ay jiraan hawlo la wada qabto. Haddaba dhaqankeenna waxaa si fican looga garan karaa ama ku cad in shaqooyinku u qaybsamaan ragga iyo dumarka.

Dhaqan ahaan waxaa jira shaqooyin ay qabtaa labka iyo dhadiggu tusaale beeraha waxaa qoda ragga, aqal soomaaligana inta badan waxaa dhisa dumarka. Waxaa kalooy sameeyaan dumarku dhammaan wayaabaha uu ka kooban yahay aqal soomaailgu sida: dhigaha, loolka, ubaha, harrarada iyo kabdaha. Markaa hawl qaybsiga ama qaybsashada shaqadu waxay keentaa jacayl iyo wada noolaansho heer sare ah. Soomaalida Itoobiya waa dad wadaaga dal, iyo deegaan dalkaas oo leh dhaqan iyo kala danbayn. Sidookale waxaa jira xushmad iyo ixtiraam xeer iyo xadhig qabta qof kasta. waana dad badan koodu muslimiin yihiin. wiilasha soomaalidu waxay aad u

xushmeeyaan dumarka tu yar iyo tu weynba waxaana mamnuuca in loo gacan qaado xataa haday kaa gardarantyihiiin.

Dhalashada gabdhaha iyo wiilasha

Ubadka ama carruurtu waxay u qaybsamaan gabdho iyo wiilal ama lab iyo dhedig waxaana bixiya eebe oo qudha. Dadka qaar waxaa lasiiyaa wiilal qaarna gabdho kuwo kalana waa lasugu daraa labadaba. Hadaba gabdhaha iyo wiilasha kii eebe ku siiyaaba waa nimco eebe oo ubaahan in lagu shugriyo.

Wiilasha iyo gabdhaha ma aha in lakala fadilo ama lakala saraysiiyo waayo mid ku anfici lama yaqaano ama lama garanayo. Wiilashu markay dhashaan waagii hore waa lagu farxi jiray oo haweenka ayaa u mashxaradi jiray waxaa kaloo lasamayn jiray xabado ayaa loo ridi jiray.

Dhaqan ahaan waxaa jirtay in wiilasha aad loo soo dhaweeyo. Dadka soomaalida oo ku noolaa nolol adag oo xooladhaqata iyo reer guuraa ah ayaa waxaa la aamin sanaa in wiilku ka ad-adyahay gabadha. Waxaa kaloo jiray dagaalo iyo colaado joogta ah oo uu wiilku kaa difaaci gabadhuse aanay awoodin. Gabdhuhu markay dhashaan waa laga nixi jiray waxaana la odhan jiray ninka gabdhaha badan waa gabtlan haduu dhimto xoolihiisa dad kalaa qaadan. Meelaha qaar kood ayaa dhaqanku ku salaysnaa fahan khaldan oo dumarka laga aaminsanaa waxaana la odhan jiray cad caana galeen caqli ma galo oo looga jeedo dumarku caqli malaha.



Cutubka 2^{aad}: Korinta Gabdhaha iyo Wiilasha

Waxaa kale oo la odhan jiray gabadhu ma aha ilmofican waayo hiilkeedu waa oohin gargaarkeeduna waa tuugo (oo loola jeedo hadaad col is heshaan way qaylin haday waxku siinaysana waa qarsoodi oo ninkeedu ma oga). Dhanka guurka waxa ka jiray khaladaad badan xoriyadana waa laga qaadi jiray mararka qaarna waxaana la siin jiray oday gaboobay. Odaygaas oo aanay doonayn inta laga qaato xoolo aad u farabadan ayaa lagu khasbi jiray. Marar ka qaarna waa la dhabar garaaci jiray waa laqaadi jiray

sida xoolaha. Dhabar garaacu waa gabadha oon waxba ogay ayaa khasab lagu kaxaysan jiray laguna guursan jiray.

Waxaas aan soo sheegnay oodhan hada waa laga soo gudbay oo waxaa la ogaaday in gabdhuhu ka naxariis badan yihiin wiilasha. Waxaa kalo la ogaaday in gabdhuhu sida wiilasha iyo si ka fiican wax u baran karaan.


Xaga talada reerka waxay ku leeyihii door muhiim ah oo xaasku waa lafdhabarta guriga. Hooyadu waa gaaguur oo waxay isku haysaa dhammaan xubnaha qoyska waxaana layidhaahdaa qofka nin waxbaray ruuxbuu wax baray qofka gabadh waxbarayna qoys dhan buu wax baray.

Dumarka ama gabdhaha soomaalidu waa dad ku caan baxay hufnaan (dhawrsannaan) naxariis kalgacial iyo xushmad ay uhayaan raggooda iyagoon kala saarin.

gabdhaha soomaalidu dhammaan way qadariyaan
ragga sidaaabaha, walaalka, seeyga(ninka)

Waxaa wanaagsan maadaama ay gabdhaha iyo
wiilashu yihiin nimco eebe nasiiyay in aan sinno
oo naan ukala eexan. Waxaa dhacda in meelaha
qaar ama dadka qaar wiilasha jecelyihiin balse
waxaa laga yaabaa in gabdhuuhu ka waxtar badan
yihiin. Awlaadaada ama ubadkaaga mid ku anfici
garan maysid ee adigu haka nabsi galin hana kala
jeelaanin. Waxaa wanaagsan in laga simo carruurta
xaga waxbarashada, dharxidhashada, dhaqaalaha,
hadalka, waxqadka ama shaqada. Gabdhaha ayaan
mararka qaar kaga fiican wiilasha waxbarashada
qaybka mid ah wiilashuna waxay ku fiican yihiin
qaybkale. Hadaba si loo helo bulsho isu dheeli taran
waa in wax labaraa labka iyo dhadigaba.

Baryahan danbe waxa la arkay gabdho ka waxtarbadan wiilasha waxtarka gabdhuhu maaha mid halkan lagu soo koobikaro. Tusaale waxaa jirtay gabadh yar oo naafa ahayd. waxay dhamaysay jaamacada jigjiga waxayka shaqaysaa xafiis waxay kaligeed biishaa reerkoodo dhan. Gabadhan yar oo kaliya maaha ee waxaa jira gabdho kale oo badan oo reerkoodii ku filaaday. Wiilasha qudhoddu waxaa ku jira wiilal yay-yar oo waxbartay oo ku filaaday reerkoodii iyo lafahoodiiba. Sidaa daraadeed ma garanayno wiilka iyo gabadha kii na anfaciye waa in aan labadooda waxbarnaa. Gaar ahaan markay yar-yaryihiin waa in aan barnaa xuquuqda ay leeyihiin iyo waaajibaadka saaran.



Cutubka 3^{aad}: Dookha habluhu waa dadnimada

Hadaba waalidiinta waxaa looga baahan yahay in ay simaan carruurta sida, la hadalka, naxariista, jecaylka, iyo siintaba. Raggu ama aabayawgu waa inay carruurtooda wiilal iyo gabdhaba ay simaan uguna farxaan markay dhashaan. Waxaa kale oo loo baahan yahay in laga simo xagga wax siinta si isku mid ahna wax ugu soo iibayaan una jeclaadaan. Dumarkuna ama hooyooyinku waa in ay isku si ugu


farxaan wiil iyo gabadhba marka ay dhashaan oo aan wiilasha oo qudha loo mashxaradin sida baryihii hore, ee waa in labadaba loo mashxaradaa looguna farxaa si isku mid ah. Carruurtu waa nimco mudan in loogu mahadiyo eebe. lab iyo dhadigna waxaana habboon in loo barbaariyo si siman ilaa ay guurka ka gaadhayaan.

Dookha iyo baadhitaanka ama xulashada guurku kuma koobnayn raga oo kaliya ee gabdhuhuna dhinacooda ayey wiilka soo doontay iska hubin jireen haybtiisa, haybadiisa, raganimadiisa iyo heerka garashadiisa.

Xirsi cabdi Aaden oo loo yiqiin Xirsi Darwiish oo noolaa, qiyastii qarnigii 19^{aad} ayaa waxa hal hays u ahaan jirtay “Raggu waa labo, howshii qaate iyo

huuto quuro leh” oo macnaheedu yahay in aan raggu ka sinneyn garaadka iyo garashada oo midna ka soo dhalaalla meeshii lagu aadiyo midna yahay habacsane ragga la wadaagga magaca oo kalliya.

Haddaba waxaan tusaale u soo qaadan karnaa, arrintan ku saabsan garashada raga ku kalla tagey gaar ahaan marka ay haweenka la baxaan oo ninkii karti lihi dhaafo, liitaaga aan meelna ka wanaagsaneyn, fadlan dhug u yeello sheekadan caanka ah. wiil ayaa gabadh la soo tagey isagoo wehel (Minxiis) ahaan u soo kaxaystay wiil kale oo ay saaxiibo ahaayeen. Gabadhii si ay u hubiso garashada wiilka ay nolosha la wadaagi doonto ayey markay cabaar la socday, cabsi gadaal laga qabeyna lala aamusnaa, ayaa gabadhii tidhi “Waar I qaaddda ama aan iddin qaaddo.



Cutubka 4^{aad}: Sarbeebihii Gabadha

“wiilkii ayaa ku yidhi” Annagu laba nin baannu nahay oo hadii aannu isugu kaa tagno waan ku qaaddi karnaaye, adigu sideebaad noo qaadii kareysaa? Saaxiibkii ayaa yidhi “Sidaas ulama jeedo ee waxay inna leedahay, ii sheekeeya ama aan idiin sheekeeyo.

Meel dhexe markii la marayo gabadhiina daal laga dareemay ayaa la gartey inla nastro, waxa la hoos fadhiistay geed damalweyne ah, markii salka la

dhigay ayey gabadhii tidhi “Aan nasano” wiilkii la soo baxay gabadha ayaa hadana yidhi “Waaban fadhinaaye waa maxay nasashada aad sheegayso?

Saaxiibkii ayaa u jawaabay oo yidhi “Waxay inna leedahay kabaha aan iska bixino”.

Socodkii ayaa lasii amba qaadey ka dibna waaggii ayaa baryey hadana gabadhii ayaa tidhi “aan af billaabano” wiilkii lasoo tagey ayaa yidhi “Cidla ciirsi la ayaan maraynaa xoolihiina waan ka nimide, sahayna ma sidanno ee iska adkeyso meel dad iyo duunyo joogaan inta aan ka gaarayno” Saaxiibkii ayaa u jawaabey oo yidhi “ujeedada hadalku sidaasi maaha ee waxay sarbeebtu u dhacaysaa aan ilkaha cadeysano”.

Intaa ka dib waxa ka hor yimid odehy boqol jir ah oo ulku tukubaya, gabadhii ayaa tidhi “Nin kaani ma soo socdaa mise waasii socdaa? ”.

Ninkii gabadha la soo tagey ayaa yidhi, “Sow umma jeedid waa naggu soo socdaa ee ma indho xumaysay. Saaxiibkii ayaa ku yidhi “Waxay ulla jeeddaa odaygu godka qarkii ayuu saaran yahay ee dad iyo duunyo ma ka tagey.

Markii tuuladii masaafadu ku ekeyd ay in yar u soo jirsadeen, aqalladiina muuqdaan, ayey hadana gabadhii tidhi “Magaaladdu madhisaa tahay mise waa dunsan tahay? Wiilkii gabadha watay ayaa yidhi, “Ma indho habeenaad baad (arag yarri) leedahay? Sow kuwaas guryuhu horteenaa ka muuqdaan.

Saaxiibkii ayaa ku yidhi” ka darroo dibi dhal, war gabadhu waxay u jeeddaa, tuuladdu sheekh wax meheriya ma leedahay mise ma laha.

Hadaba, markii wadaadkii gabadha meherin lahaa la hor fadhiistay, ayey gabadhii sheekhii u sheegtay, in mudaddii la soo socday ay wiilka la soo tagey, waydiisay su ‘aalo xujo ah dhammaan su ‘aalahaasi midna waa garan waayey, waxaase sida saxda ah ugu jawaabey saaxiibkii sidaa awgeed waxay sheekha ka hor caddeysay innay walaayadeeda u dhiibayso oo kaliya hadii wiilka su’aha xujada ah furay ku meherinayo, iyadoo waliba ku adkeysaneysa ineysan reerkoodii u noqoneyn iyadoon mehersaneyn’ sidaas, ayaana gabadhii loogu meheriyey wiilkii ay dal batay, halka kii la soo baxayna ka mid noqday markhaatiyadii nikaaxa.

Gunaanadkii

Sheekadan waxaan ka fahanay garashada gabdhaha qaarkood iyo in ay ragga qaar badan gabdhuhu ka caqli iyo garasho dheeryihiiin. Gabadhan oo su'aalo badan wiilka waydiisay ayaa waxay tusaysaa kartideeda iyo garashadeeda dheeriga ah. Dhaqanka soomaalida ayaa ah in wiilku gabadha uu nolosha lawadaagi lahaa dhinacyo badan ka eego. Waxyaabaha gabadha lagu doortana waxaa ka mid ah kartida eebe siiyay dadnimada diinta akhlaaqka fiican iyo kuwo kale. Gabdhaha soomaalidu waxay iyaguna sifiican isaga eegaan seeyga ama ninka ay noloshala wadaagi lahaayeen. Isku soowada duub oo kartida, dadnimada, caqliga iyo aqoontu waa mid aan jinsina gaar u ahayn waana loosiman yahay. Waxaana haboon in wiilashuna gabdhaha doorkooda u qiraan gabdhuhuna wiilasha doorkooda uqiraan tartan iyo is reebreebkana layska daayo.

Laylis

Kajawaab su'aalahan

1. Waa maxay cayntu?
2. Midkee waxtar badan gabdhaha iyo wiilasha?
3. Maxaad ka fahentay sheekada?

